

Sharci lamba. 9 ee 5 Maarso 1967

Sharci la xiriira “wax ka beddelida qod 4 iyo 6 ee Xeer-Sharci lamba. 11 ee 6 Setember 1964 oo khuseeya Ilaalinta iska wax u qabso ah ee gobolka” oo loo beddelay sharci lamba. 7 ee 29 Oktoober 1964

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib uu helay oggolaanshaha Golaha Qaranka;

WAXAA LA SOO SAARAY

Sharciga halka ku tilmaaman;

Qod. 1

Qod. 4 ee Xeer-sharci lamba. 11 ee 6 Setember 1964 oo loo beddelay sharci lamba. 7 ee 29 Oktoober 1964 waxaa loo beddeley sidatan;

Qod. 4 “ muwaadinka iska wax u qabso oo isku xilqaamay in uu u shaqeeyo hey’ada militariga ilaa iyo intii hey’adaasi ay u baahan tahay shaqadiisa ee la xiriira howlaha difaaca dalka” .

Qod. 2

Qodobka 6 ee Xeer-Sharci lamba. 11 ee 6 Setember 1964 oo loo beddelay Sharciga lamba. 7 ee 29 Oktoober waxaa loo beddeley sida hoos ku qoran:

“ Qod. 6 – Laga bilaabo maalinta ay shaqada u soo xaadiraan, ciddii iska wax u qabso ku shaqeyneysa waxay xaq u yeelan doonaan raashin ama lacag kaash ah oo u dhigmata Sh.So. 4 maalin kasta”.

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta markii lagu soo daabaco.

Sharcigaan waxaa lagu keydin doonaa Keyda Rasmiga ee Shuurucda iyo Xeerarka ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Waxaa la faraaya cid kasto in loo hoggansado sharciga loona hoggamiyo cidka.

Muqdisho, 5 Maarso 1967.

Aden Abdule Osman

Rai’sul Wasaaraha

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Difaaca

Abdirahman Haji Munin